



Hooyo adaa qacanta ku haya dabargoynta gudniinka fircoonigaa

Gudniinka fircoonigaa saamayntuu ku leeyhay hablaha iyo haweenka soomaliyeed lama soo koobi karo. Hooyo qaali adiga ayaa maanta qacanta ku haya sidii loo dabarjari lahaa dhaqankan dulmigaa. Hablaha sharaftooda uma biiryo caafimaadkoogana wuu kaga ciyaraa. Aqoon la'aani waa iftiin la'aan bey soomaalidu ku maah maahdaa. Diinta islaamku maalintey dhasheen habluhu bey sharaf iyo karaamo siisay.

Hooyo haweenka kale iyo hablahaba u sheeg guniinka fircoonigaa in uu yahay dulmi iyo dembi toos ah. Ku dhiirri geli bulshada somaaliyeed, siiba dumarka in dhaqankan la dabargooyo. Tusaalahaga bedel weyn oo wanaagsan buu u keenaya bulshada soomaaliyeed. Kumaad lahayn go'aan adigu gudniinkaagii yaraantaa, maantase awood aad kaga hortatagi kartid fircooniga baad leedahay.

Hooyo qaali adiga ayaa maanta qacanta ku haya
sidii loo dabargoynta gudniinka fircoonigaa.